
NATIONWIDE CHILDREN'S®
*When your child needs a hospital, everything matters.*

**Helping Hand™** *Health Education for Patients and Families*

# Cudurka Unugyada Dhiiga (SCD)
# Sickle Cell Disease (SCD) (Somali)

Cudurka unugyada dhiiga (SCD) waa cudurka dhiiga raago ee u gudbiyo (laga dhaxlo) waaladiinta oo dhinaca hidda sidaha. Cudurka unugyada dhiiga wuxuu saameeyaa qeybta unuga dhiiga cas ee loo yaqaan bururiinka dhiiga. Wuxuu ka caawiyaa inuu u qaado oksijiin qeybaha kala duwan ee jirka. Unugyada dhiiga cas way wareegsanyihiin, simman, oo si fudud ugu dhaqaaqo dhinaca jirka.




Illaha sawirka: Xarunta Qaranka ee Ciladaha Dhalashada iyo Curyaannimada Hormarka, Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka

**Sawirka 1** Unugyada dhiiga cas ee jiran way adagyihiin, dhagdhag ah, oo u qaabeysan sida moos.

Dadka qabo cudurka unugyada dhiiga ayaa leh unugyo dhiiga cas ee adag, dhagdhag ah, qaabka mooska (Sawirka 1). Unugyadaan dhiiga jiran waxay ku qabaan dhibaato adag inay maraan xididaha yar ee dhiiga. Way badan karaan oo xinjireeyaan xididaha. Markii ay xanibaad dhacdo, dhiiga ma geyn karo oksijiin ku fillan qeybaha qaar ee jirka.

## Hiddooyinka Cudurka Unugyada Dhiiga

**Burutiinka dhiiga A** waa caadi, burutiinka dhiiga aan unugyada jiraneyn. **Burutiinka dhiiga S** waa caadi, burutiinka dhiiga jiran. Cudurka unugyada dhiiga waxaa sababo burutiinka dhiiga S. Dhammaan dhallaanada cusub waxaa laga baaraa labadaba cudurka unugyada dhiiga iyo dhaxlida.

- Haddii aad dhaxashay **1 caadi, hidaha aan unuga jiraneyn (A)** iyo **1 hidaha unuga jiran (S),** waxaad qabtaa dhaxlida unuga jiran. Waxaad tahay sidaha cudurka unugyada dhiiga. Tan micnaheeda ma ahan inaad qabtid cudurka unugyada dhiiga. Haddii **labada** waalidba u gudbiyaan dhaxlida burutiinka dhiiga S, canugooda wuxuu yeelanayaa burutiinka dhiiga SS. Kan waa nooca cudurka unugyada dhiiga ee loo yaqaan dhiig la'aanta unuga dhiiga jiran.


©1997, dib loo eegay 2022, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

| AA<br>(ma ahan unugyada jiran) | AS<br>(dhaxlida unuga jiran) | SS<br>(cudurka unugyada dhiiga) |
|---|---|---|
| 25% fursada lagu yeelanayo 2 hidda caadi ah | 50% fursada lagu yeelanayo 1 hidda caadi ah (A), iyo 1 hiddaha unuga jiran (S) | 25% fursada lagu yeelanayo 2 hiddo unuga jiran |

- Haddii 1 waalid uu qabo dhaxlida cudurka dhiiga cas iyo 1 waalid uu qabo burutiinka dhiiga aan caadiga aheyn oo ay qabaan canug, canugaas wuxuu sidoo kale qabi karaa cudurka unugyada dhiiga. Dhiig la'aanta aan caadiga aheyn waxaa ka mid noqon karo cudurka dhiiga ee dhaxalka ah, burutiinka dhiiga aan caadiga aheyn C, ama burutiinka dhiiga aan caadiga aheyn E.

## Waxyaabaha Saameeyo Cudurka Unugyada Dhiiga

Cudurka unugyada dhiiga ayaa qof walba u saameeyo si ka duwan. Ma jiraan qaab lagu ogaanayo sida daran ee canugaaga u jiranayo. Waxyaabaha qaar ee saameeyo iyaga waa:

- Nooca cudurka unugyada dhiiga. Noocyada qaar ayaa sababo dhibaatooyin ka yar kuwa kale.
- Tayada daryeelka caafimaadka ee canugaaga helo.
  - Canugaaga waa inuu aadaa dhaqtarka ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ee ku taqasusay cudurka unugyada dhiiga.
  - Hab dhaqanka caafimaadka waa inuu lahaadaa koox kaalisooyin ah, shaqaalaha bulshada, la taliyayaasha hiddaha, iyo cilmi nafsiilayaal.
- Daryeelka guriga. Si aad ugu haysid canugaaga si caafimaadan:
  - Ha cabaan biyo badan. Wixii ilmaha, caanaha gasaca iyo caanaha naasaha ayaa wato biyo ku fillan.
  - Hubi inay u qaataan dhammaan daawooyinka sida loogu qoray.
- Daryeelka banaanka ah ee canugaaga loogu tallogalay. U sharax qaraabada, saaxibada, iyo macalimiinta waxa baahiyaha daryeelka caafimaad ee canugaaga yahay.
- Ogow goorta canugaaga u baahanyahay daryeelka caafimaadka ee qandhada. Raadi caawin haddii canugaaga uu:
  - Wax ka yar 4 bilood oo leh qandho gaareyso ama ka sareyso 100.4° Heerka (F) ama 38° Digriiga (C).
  - Ka weyn 4 bilood oo qabo qandho gaareyso ama ka sareyso 101° Heerka ama 38.3° Digriiga.

## Dhibaatada ay Sababto SCD

- **Caabuqyada** waa mid ka mid ah dhibaatooyinka halista ah ee carruurta qabta SCD ay yeelan karaan.
  - Sababta: Unugyada jiran way xanibi karaan xididada dhiiga kaas oo dhaawaco beer yaraha. Shaqada beeryaraha waa ku caawinta jirka inuu la dagaalamo caabuqyada.
  - Waxa ay tahay inaad sameyso: Carruurta 0 illaa 5 sanno jirka waa inay qaataan penicillin 2 jeer maalintii. Tallaalada tallaalkooda waa in la cusbooneysiiyaa. Xasuuso qandhada waa xaalad degdeg ee caafimaad iyo in canugaaga u baahanyahay in laga arko islamarkiiba qandho ka sareyso 101° Heerka ama 38.3° Digriiga.
- **Xanuunka** wuxuu ku imaan karaa lama fillaan, si xoogan, oo aan digniin laheyn.
  - Sababta: Xididada dhiiga xabibmay waxay xiraan qulqulka oksijiinka. Oksijiin la'aanta ayaa ku sababi karo qeybtaas ee jirka xanuun.
  - Waxa ay tahay inaad sameyso: Ha cabo canugaaga dareere badan, ha isticmaalo kuleel, masaajee aaga, oo sii daawada xanuunka sida acetaminophen (Tylenol®) ama ibuprofen (Motrin®, Advil®). Canugaaga wuxuu yeelan karaa daawada xanuunka ee uu qoray bixiyahooda. Haddii xanuunka aanan lagu maareyn karin guriga, waxay u baahan kartaa in loogu daaweeyo isbitaalka daawo xoogan.
- **Dhiig la'aanta** waxay ka dhigi kartaa canugaaga inuu si fudud u daalo ama u seexdo si wanaagsan.
  - Sababta: Unugyada jiran ma noolaadaan haddiiba unugyada dhiiga cas uu caadi yahay. Markii ay jiraan unugyada dhiiga cas oo yar, waxaa sidoo kale jira burutiinka dhiiga yar ee ku jiro jirka. Tan ayaa loo yaqaan dhiig yarida.
  - Waxa ay tahay inaad sameyso: Si joogta ah ugu dhiirogeli nasiiyooyinka gaaban iyo isku dayida raacida jadwal joogta ah. Caadi ahaan, dhiig la'aanta uma baahno in la daaweeyo illaamaa canugaaga aysan u suurtogaleynin inay sameeyaan howlahooda caadiga ah.

## Qaliinka

Haddii canugaaga uu qabo nooc walba oo qaliin ah, hubi in dhaqaatiirta iyo bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ogyihiin inay qabaan cudurka unugyada dhiiga.

- Soo wac rugta caafimaadka unugyada dhiiga markii nooc walba oo qaliin ah ay jadwaleysantahay.
- Canugaaga wuxuu u baahan karaa baaritaanada dheeraadka ah ee dhiiga qaliinkooda ka hor.
- Carruurta qaar ayaa u baahan karo dhiig ku shubida haddii heerka burutiinka dhiigooda uu hooseeyo.

## Goorma ayay tahay in la waco 911

U soo wac 911 wixii caawin degdeg ah haddii canugaaga:

- U neefsanayo si tartiib ah ama joojiyo neefsashada.
- Uusan jawaab laheyn oo uusan kula hadli karin.
- Uusan ka kici karin hurdada gaaban.
- Uu qabo tabar dari lama fillaan ah, luminta dareenka, ama uusan dhaqaajin karin qeybta jirka.

Haddii canugaaga uu jirado inta lagu jiro maalinta, ka soo wac kaalisada unugyada dhiiga (614) 722-8914 Isniinta illaa Jimcaha, 8 a.m. illaa 4:30 p.m.

- Haddii aanan la heli karin, fadlan ka soo wac Rugta caafimaadka Unugyada Dhiiga (614) 722-3250.
- Maqribadii, dhammaadyada isbuuca, iyo fasaxyada, ka soo wac (614) 722-2000 oo ku weydii wacitaanka dhaqtarka dhiiga.